

# COVID-19: Marin Ugu Helitaanka Gargaarka Iyadoo Loo Maro Maine DHHS

*Intii lagu jiro xaaladdan arrimo isbiirsiga leh ee cudurka COVID-19 (koronafayraska cusub ee 2019), Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Maine (DHHS) ayaa beddeleysa qaar ka mid ah siyaabaha aan ula macaamilno dadwaynaha, laakiin waxaan wali u heellannahay inaan hubinno inay reer Maine helaan kheyraadka ay ugu baahan yihiin inay ku noolaadaan nolol caafimaad-qab iyo waxsoosaar leh.*



*La-Cusboonaysiiyay: Maarj 19, 2020*

## Taageerada Ku Meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF)

Haddaad la dhibaataysan tahay inaad wax uga qabtaan baahiyaha aasaasiga ah ee carruurtaada, waxa dhici karta inaad uqalanto Kaalmada Ku-Meelgaarka ah ee loogu talagalay Qoysaska Baahan. Barnaamijkan ayaa bixiya dheef lacag kaash ah oo ku meelgaar ah oo lagu caawiyo waalidiinta sidii ay wax uga qaban lahaayeen baahiyadan.

## Kaabista Cunnada

Haddaad la dhibaataysan tahay ugu inaad quudiso naftaada ama qoyskaagaba, waxa laga yaabaa inaad uqalanto dheefaha **Kaabista Cunnada**. Kaabista Cunnada ayaa ka caawisa qoysaska dakhligoodu hooseeyo inay iibsadaan cunyada ay ugu baahan yihiin caafimaadka wanaagsan.

## Taakulaynta Daryeelka Caafimaadka

Haddii adiga ama xubin qoyska ka mid ahi aad tihiin bilaa daryeel caafimaad ama aad la dhibaataysan tihiin biximaha daryeelka caafimaadka, waxa laga yaabaa inaad uqalantaa **Taakulaynta Daryeel Caafimaad**. Taakulaynta Daryeelka Caafimaadka, oo ay ku jiraan MaineCare, CubCare iyo Barnaamijyada Dadka Baahida Uqaba Caafimaadka, ayaa ka bixiya biximaha daryeelka caafimaadka.\*

**Taakulaynta Degdegga ah** ayaa u siisaa dheef qoysaska carruurta leh xaaladaha degdegga qaarkood markay qoysku halis u noqdaan saboolnimo iyo guri'la'aan. Xaaladahan waxa ka mid ah dabka, masiibooyinka kale ee dabiiciga ah, ka joojinta adeegga, ama ka saarista guriga. Lacag biximaha waxa la oggolaan karaa oo keliya hal mar sannadkii oo si toos ah loogu bixiyaa wax iibiye.

**Child Care Subsidy (Kabista Daryeelka Ilmaha)** ayaa ah barnaamij ay maamusho Xafiiska Adeegyada Ilmaha iyo Qoyska oo ka caawiya qoysaska uqalma inay bixiyaan kharashka daryeelka ilmaha si ay u shaqeeyaan, ama u aadaan dugsiga ama uga qeybqaataan barnaamij tababaritaan shaqo. Booqo <https://www.maine.gov/dhhs/ocfs/ec/occhs/step.htm> ama wac 1-877-680-5866 inaad codsato.

**Taakulaynta Guud** waa barnaamij laga maamulo dawladaha hoose ee iibiya waxyaabaha daruuriga u ah shaqsiyaadka aan awoodin inay iska bixiyaan. Codsiyada loogu talagalay Taakulaynta Guud ayaa lagu samayn karaa xafiis kasta oo dawlada hoose ah. Booqo [www.211maine.org](http://www.211maine.org) ama wac 211 si laguugu xiro ilaha bulshada.

\*Haddaad weydo caynsanaanta caymiska caafimaad ee lagu bixiyo shaqadaada, oo **aad**an uqalmin MaineCare, waxa laga yaabaa inaad uqalanto Muddada Qoritaanka Gaarka ah si aad u iibsato qorshe caymis caafimaad iyada oo loo maro [HealthCare.gov](http://HealthCare.gov). Iyada oo ku xiran dakhligaaga reerkaaga, waxa laga yaabaa inaad uqalanto taakulaynta lacageed ee laga helo dowladda federaalka si loo awoodo qaddar xilliyeedka (affordable). Si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato oo aad u hubiso inaad uqalanto, booqo [CoverME.gov](http://CoverME.gov).



## Xafiiska Madax-bannaanida Qoyska

*Xafiiska Madax-bannaanida Qoyska ayaa ka shaqeeya codsiyada oo go'aamiya u-qalmitaanka loogu talagalay dhowr barnaamijyo iyo dheefo DHHS iyada oo ay u dheer tahay adeegyada taageerada ilmaha.*

### Sida Ioo Codsado Dheefaha:

Kaga codso onlayn [www.maine.gov/mymaineconnection](http://www.maine.gov/mymaineconnection)

Boostada ugu dir codsiga 114 Corn Shop Lane, Farmington, ME 04938

Faakis Ugu Dir Codsiga 207-778-8429

limayl ugu soo dir codsiga Farmington.dhhs@maine.gov

Keen ama ku buuxi codsi xafiiska DHHS ee deegaankaaga. In kasta oo codsiga waraaqaha la aqbali doono, kuwa u baahan caawimada dheeraadka ahi waa inay wacaan lambarka telefoonka korka ku qoran si ay ula hadlaan wakiil.

Ku codso telefoonka adiga oo la hadlaya Khabiir Uqalmitaan (tani waxay **kaliya** xulasho loogu talagalay tahay codsiyada MaineCare. Tani wali xulasho loogu talagalay Kaabista Cunnada ama TANF).

Booqo [www.211maine.org](http://www.211maine.org) ama wac 211 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19 iyo waliba taageerooyinka aya ka midka yihiin kaabista cuntada loogu talagalay Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta (WIC), Taakulaynta Guud, Kaalmada Guriyaynta, ilaha daryeelka carruurta, iyo barnaamijyada dadwaynaha.

### La xiriir:

Ku Diritaanka Boostada:

114 Corn Shop Ln,  
Farmington, ME 04938

Faakis: 207-778-8429

Telefoon: 1-855-797-4357

limayl:

Farmington.dhhs@maine.gov